# HESHIISKA CAALAMIGA AH EE XUQUUQDA DADKA NAAFADA AH

## Hordhac

### Wadamada Hadda Xubnaha ka ah Heshiiskan:

a) Iyadoo maanka lagu hayo mabaadi'da ku cad Axdiga Qaramadda Midoobay ee qeexaya Sharafta uu la dhasho aadamiga, qiimaha ay leedahay, iyo xaqa sinnaanta ee uu wada leeyahay dhammaan baniiaadamka, sida xuriyadda,cadaalada, iyo nabadda addunka,

b) Iyadoo maanka lagu hayo in Qaramadda Midoobay oo adeegsanaysa Bayaanka Caalamiga ee Xuquuqul Insaanka, iyo Heshiisyada kale ee Caalamiga ah ee ayaguna qaabilsan Xuquuqul Insaanka ay ku dhowaaqday, la'guna heshiiyay in uu qof walbo xaq-uleeyahy dhamaan xuquuqaha iyo xuriyaadka halkan ku qoran, iyadoon kala soocid lahay,

c) Iyadoo dib loo xaqiijinayo caalamininada, kala qaybsan la'aanta, isku tiirsanaanta, iyo isla xiriirida ay isla xiriirsanyahiin dhamman xuquuqaha bani aadamka iyo xuriyaadka aasaasiga ah iyo baahida ay dadka naafada ah u qabaan in loo damaanad qaado si dii ay oo gu naaloon lahaayeen dhamman xuriyaaadka aan soo sheegnay iyadoo aynan jirin kala faquuq,

d) Iyadoo maanka lagu hayo Heshiiska caalamiga ah ee ku saabsan dhaqqalah, arrimah bulshada iyo dhaqanka, Heshiiska caalamiga ah ee ku saabsan arrimaha rayidka, iyo Xuquuqda siyaasadeed, Heshiiska Caalamiga ah ee Ciribtiridda dhamman noocyada ku saabsan kala faquuqa jinsiyadda, Heshiiska Caalamiga ah ee ciribtirka Kalafaquuqa haweenka, Heshiiska looga soo horjeedo jirdilka, iyo noocyada kale ee ciqaabta ah ka baxsan baniaadnimada, ama wax u dhimista baniadnimada, amaba ciqaab, Heshiiska ku saabsan xuquuqda caruurta, Heshiiska caalamiga ah ee dhowrista xuquuqda muhaajiriinta shaqaalaha ah iyo qoskoodaba,

e) Iyadoo la aqoonsanyahay in naafanimada ay tahay fikrad soo ifbaxaysa kana soo ifbaxaysa isla falgal ay isla-falgaalayaan dad awoodooda waxqabasho ay xakamaysantahay maskax iyo dhaqan ahaanba, sidoo kalena xaaladda deegaankana ay kaalmaynaynin si ay si buuxo ooga qaybqaataan arrimaha bulshada- ayaga oo la siman dadka kale,

f) Iyadoo maanka lagu hayo muhiimadda ay leeyihiin mabaadiida iyo siyaasadaha ay dadka raacaan ee kuna qoran Qorshaha Guud ee Addunka, qorshahaas oo khuseeya dadka naafada, iyo iyadoo la raacayo habraaca caalamiga ah eek u saabsan u sinnaashaha xuquuqda Ddka naafada ah kuwaas oo ka aragti-dhiibanaya habka dalacsiinta, dejinta iyo qiimaynta siyaasadda, qorshayaasha, iyo wax qabadka heerka qaran, gobol, iyo caalamiba, taas oo lagu looga danleeyahay in dadka naafada ah ay ku helaan wixii fursan ah aee jira.

g) Iyadda oo xooga la saarayo siddi arimaha naafada ay qayb muhiim ah ooga noqon lahaayeen habka istratejiyada guuud ahaaneed ee lagu gaarayo horumar waara.

h) Sidoo kale, iyadoo la qirayo in qofka oo lagu takooro naafanimo ay tahay xadgudub lagu samaynayo sharafta uu baniaadamka la dhashasho iyo guud ahaan qiimaha uu leeyahay qofka baniaadamka ah.

i) Iyadoo la sii garwaaqsanyahay in xaaladda dadka naafada ah ay kala duwantahay.

j) Iyadoo la qirayo baahida loo qabo in la horumariyo lana ilaaliyo xuquuqda aadanaha ee dhamaan dadka naafada ah, kuwaas oo ay ku jiraan kuwa u baahan kaalmo dheeraad ah ee degdeg ah.

k) Hadana in kasta oo ay jiraan heshiisyada aan kor ku soo sheegnay iyo go’aano la xiriiraba, hadana dadka naafada ah waxay si joogto ah ula kulmaan faquuq, si-simanna looguma tixgeliyo bulshada dhexdeeda waxaana lagu xadgudbaa xuquuqdooa dhammann dunida oo dhan.

l) Iyadoo la garwaaqsanyahay muhiimadda ay leedahay in iskaashi caalami ah laga sameeyo horumarinta xaaladda nolaleed ee dadka naafada ah ee dal kasta, gaar ahaan kuwa dalalka soo koraya.

m) Iyadoo la garwaaqsanyahay qiimaha ay leeyihiin iyo kan ay lahaandoonaa dadka naafada ah, una lahaandoonaa jiritaanka guud ee baniaadmka iyo

kala duwanaansha bulshadooda, iyo in sidoo kale si buuxda loo hormumariyo sidii dadka naafada ay oogu naaloonlahaayeen xuquuqdooda baniaadnimo iyo xuriyadooduba arrintan oo horumarinaysa kamidahaanshaha ay ka mid ahaanayaan bulshada ay horumarinayo baniaadinimada, iyo horumarinta dhaqaalaha iyo ciribtiridda saboolnimada.

n) Iyadoo la garwaaqsanyahy muhiimada ay leeyihiin dadka naafada ah dadnimadooda, madaxbannaanida shaqsiga ee ay leeyihiin, iyo xornimadooda oo ay ku jirto xoriyad ay ku xushaan wixii ay rabaan.

o) Iyadoo la tixgelinaayo in dadka naafada ay fursad inay ku dedaalaan in geedi socodka go'aan qaadashada ku saabsansiyaasadaha iyo barnaamijyada, oo ay ku jiraan kuwa si toos ah iyaga ku saabsanaa, qaran, qowmiyad, wadaniga ah ama bulshada asal ahaan, hanti, dhalasho, da'da ama xaalada kale, shiiyeen sida soo socota.

p) Annagoo ka walaacsan xaaladda adage ee ay la kulmaan dadka naafada ah, kuwaas oo lala beegsado arrimo farabadan ama xaalado xun oo midab takoor ah kuna qotoma jinsiyaddooda, midabkooda, dhedig ama labnimadooda, luqadooda, diintooda, siyaasadooda ama fikraddooda iyo jinsiyaddooda, asalkooda, asal ahaan meesha ay kasoo jeedaan, bulsho ahaan meesha ay kasoo jeedaan, hantidooda, dhalashadooda, da’da ama xaalado kale oo ay ku suganyihiin.

q) Annagoo gar waaqsan in haweenka iyo gabdhaha naafada ah ay inta badan dhibaato culus la kulmaan, kalana kulmaan gurigooda dhexdiisa iyo banaankiisaba, dhibaatadaasoo iskugu jirto xadgudub, dhaawac, gaboodfal, dac-darrayn, daawayn la’aan, iska-dhaafid iyadoon la daawayn, ama ka faa’iidaysiga.

r) Iyadoo la garwaaqsanyahay in caruurta naafada ah ay xaq u leeyihiin inay helaan dhamaan xuquuqda iyo xurriyaadka asaasiga ah sida caruurta kaleba, iyo iyadoo lays xasuusinaayo in wadamada qaybta ka ah heshiiskan ay isku waajibiyeen dhowritaanka xuquuqda caruurta.

s) Iyadoo hoosta laga xarriiqaayo in dhamaan dadka naafada ah ay ku noolyihiin xaalad saboolnimo, sidaas darteedna si aad ah loogu baahanyahay in wax laga qabto saboolnimada haysa dadka naafada ah.

t) Iyadoo hoosta laga xariiqayo in badi dadka naafada ah ay ku noolyihiin xaalad faqrinimo, sidaas darteedna la garwaaqsanyahay baahida adage in wax laga qabto faqriga haysto dadka naafada ah.

u) Iyadoo maanka lagu hayo in xaaladda nabadda iyo amniga ee ku salaysan dhowritaanka axdiga Qaramada Midoobay, iyo dhowridda heshiisyada khuseeyo Xuquuqul Insaanka, ay dhamaantoodna lagama maarmaan u yihiin badbaadinta dadka naafada ah, gaar ahaan marka ay jirto colaad, ama dalka lagusoo duulo.

v) Iyadoo maanka lagu hayo muhiimadda ay leedahay in dadka naafada ah ay helaan xuquuqda bulsho iyo dhaqaale, tacliinta, xogta iyo is-gaarsiintaba oo dhamaantood u suurta gelinaysa dadka naafada ah inay ku naaloodaan xurriyadda bani'aadamka iyo xuquuqda asaasiga ah.

w) Iyadoo maanka lagu hayo in shakhsiga xilka u haya dadka kale ama bulshada, bulshadaas oo uu kamid yahay qofka xilka hayo, mas'uuliyadna ka saarantahay sidii uu ku dhowri lahaa kuna ilaalin lahaa xuquuqda ku qoran Sharciga Caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka.

x) Iyadoo lagu qanacsanyahay in qoysku uu yahay kan caado iyo asal ahaanba noqonaya unugga bulshada, qooyskaas oo xaq u leh inuu badbaado ka helo bulshada iyo dowladdaba, sidoo kalana, dadka naafada ah iyo qoysaskoodaba waa inay helaan badbaado iyo kalmo si ay wax ugu taraah qoysaskooda, kuwaas oo ayaguna helaya inay si buuxda ugu naaloodaan xuquuqda bani'adamka.

y) Iyadoo lagu qanacsanyahay in sharci dhamaystiran kana mid ah shuruucda caalamiga ah ee horumar iyo badbaadaba siinaayo xuquuqda iyo sharafta dadka naafada ah, wax wayna ka badalaysa, si aad ahna u horumarinayso wax-kaqabashada xaqdarrada aadka aadka u wayn ee dadka naafada ahi la kulmaan, sidoo kalana horumarinaysa ka-qaybgalka dadka naafada ahi ka qaybgalayaan arrimaha bulshada, , siyaasadda, dhaqaalaha, arrimaha dhaqanka, sidoo kalan siinaysa fursad lamid ah tan ay helaan dadka kale, hadii ay joogaan wadamada horumaray ama wadamada soo koraayo.

**Sidaa darteed waxay ku heshiiyeen arrimahaan soo socda:**

## Qodobka 1

## Ujeeddada

Ujeeddada Heshiiskani waxay tahay in lagu horumariyo, lagu difaaco laguna adkeeyo sidi dadka naafada ah u heli lahaayeen oo ay si buuxda ugu raaxaysan lahaayeen dhamaan xuquuqul insaanka iyo xorriyaadka asaasiga ah, sidoo kalena lagu horumarin lahaa xaq-sharafeedka ay la dhasheen.

Dadka naafada ah waxay ka koobanyihiin kuwa muddo dheer ay ka haysato dhibnaato ama caqabado jir ahaan, maskax ahaan, garasho ahaan ama ayba haystaan dhibaatooyin marka ay la fal-galayaan dadka kale, dhibaatooyinkaasoo u diidaaya inay bulshada inteeda kale si siman ula dhaqmaan.

## Qodobkla 2

## Qeexid

**Si aan u fahamno Heshiiskani:**

"Is-gaarsiin" waxyaabaha loo adeegsado waxaa kamid ah hadalka, soo bandhigista hadal-qoraal, farta indhoolayaasha, taabashada, daabacaad far waaway lagu daaboco, fursad u helidda warbaahinta sida qoraalka, dhagaysiga, luqadda caadiga ah, aqrinta bani'aadamka iyo habaka kale ee wax lasykugu sheego iyo adeegsiga warbaahinta casriga ah sida xogta iyo adeegsiga teknolojiyadda.

"Luqad" waxay ka koobantahay hadalka, calaamadaha gacanta iyo habka war is-gaarsiineed ee aan ahayn hadalka.

"Midab takoorka la xiriira dadka naafada ah" waxaa loola jeedaa dadka naafada ah oo si muuqato looga reebo faa'iidooyinka dadka kale ay helaan iyadoo loo sababaynaayo naafanimadooda , waxaana loo diidayaa aqoonsiga iyo inay si buuxda ugu naaloodaan xuquuqul insaanka caadiga ah iyo xorriyadda, waxaana

kamid ah xorriyadda siyaasadda, dhaqalaha, iyo tan rayyidka ahba, sidoo kale waxaa kamid ah faquuqidda la faquuqayo dadka naafada ah waana faquuqid caadi iska noqota.

"Ogolaansho si macquul ah" waxaa loola jeedaa dadka naafada ah loola dhaqmo si macquul ah oo sababaysan, dushana aan looga keenin wax aan tabartooda u dhigmin, ama aan la saarin culays aan tabartooda ahayn. Sidoo kale, waa in loo ogolaadaa dadka naafada inay ku naaloodaan xuquuqul insaanka iyo xorriyaadka asaasiga ah.

"Universal Design – Habka guud ee caalamiga ah" waxaa loola jeedaa soo saarista alaabaha oo si guud loosoo saaro, arrimaha deegaanka, barnaamijyada iyo adeegyada ay isticmaalaan dhamaan dadka oo dhan, kuwaas oo dad gaar ah aan uga baahnayn inay si gaar ah ula qabsadaan. "Universal Design" marka laga hadlaayo "Universal Design" waa inayna meesha ka maqnaanin alaab gaar ah oo loogu talo galay dadka naafada ah.

## Qodobka 3

## Mabaadi'da guud

### Mabaadi'da guud ee Heshiiskan waxaa kamid ah:

a) In la ixtiraamo sharafta qofku uu la dhasho, madaxbanaanida qof ahaaneed taas oo ay kamid tahay sida xorriyadda qofku uu u leeyahay go'aan qaadashadiisa iyo madaxbanaanida qof ahaneed.
b) Takoorid la'aan
c) Ka qeyb gal buuxa oo arimaha bulshada dhexdooda ah

d) Xurmaynta kala duwanaanshaha iyo ogolaansho la ogolaado dadka naafada ah, maadaama ay ka mid yihiin bani'aadamka, leeyihiinna sharafta bani'aadamka.
e) U sinnaashaha fursadaha jira
f) In fursad loo wada simanyahay la helo
g) Ragga iyo haweenka inay sinnaadaan
h) In la ixtiraamo awoodda waxqabad ee soo baxaysa ee dadka naafada ah, sidoo kalena la ixtiraamo xaqqa caruurta naafada ah, lana ilaaliyo naafanimadooda .

## Qodobka 4

## Waajibaad guud

1- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay u hawlgalaan sidi ay ku xaqiijin lahaayeen, kuna horumarin lahaayeen sidi dadka naafada ah ay u helilahaayeen xorriyaadkooda buuxa ee bani'adamnimo oo aan lagu faquuqin naafanimo darteed. Si loo gaaro ujeeddadan, Waddamada waxay qabanayaan arrimaha soo socda:

a) Waxay dejinayaan wixii shuruuc maamul iyo sharci ah ee ku habboon hirgelinta Shuruucda lagu aqoonsaday Heshiiskan
b) Inay ka qaadaan tallaabo ku habboon, tallaabadaas oo kamid ah Sharciga, oo ay wax uga baddalayaan ama ay ku baabi'inayaan shurucdda, maamullada, caadooyinka iyo dhaqanka hadda jira ee faquuqaayo dadka naafada ah.
c) Inay tixgeliyaan sidi lagu badbaadin lahaa laguna horumarin lahaa xuquuqul insaanka dadka naafada ah kuwaas oo la waafajinaayo wixii siyaasad iyo qorshe ah.
d) In laga joogsado nooc kasta oo fal ah ama dhaqan ah ee aan la socon karin Heshiiskan, sidoo kalena waa in la xaqiijiyaa in mas'uuliyiinta qaranka iyo hay'adahaba u hawlgalaan si waafaqsan Heshiiskan.

e) Inay qaadaan tallaabo ku habboon oo lagu baabi'inaayo wixii faquuqid ah ee lagula koco dadka naafada ah, haddii ay ahaan lahaayeen ururo jiro ama shirkado gaar loo leeyahay.

f) Inay u hawlgalaan ama ay horumariyaan sidi cilmi baaris loogu samayn lahaa loona horumarin lahaa si heer caalami ah alaabta, adeegyada, iyo qalabka iyo goobaha (waa sida ku cad Qodobka 2aad ee Heshiiskan) alaabtaas oo ka dalbanayso dadka naafada ah dadaalka ugu yare ee ay kula qabsan karaan. Sidoo kalena waa in la horumariyaa sidi alaabta iyo adeegyada aan sheegeyno loogu diyaarin lahaa heer caalami ah iyadoo la raacaayo habraaca guud ee aduunka iyo tilmaamooyinka (dadka naafada waa in loosoo saaraa, sida dadka kale, alaab baahidooda haqab tiraysa oo ay la qabsan karaan).

g) In loo ogolaado dadka naafada in wixi xog ah ay si toos ah u helaan, xogtaas oo horumarinaysa dhaq-dhaqaaqooda sida adeegsiga qalabka iyo tiknolojiyadda iyo wixi kale ee kaalmo ah ee jira iyo adeegyada kale ee jiran.

h) In loo ogolaado dadka naafada ah wixi xog ah ee horumarinaayo dhaqdhaqaadooda sida adeegsiga qalabka, teknolojiyadda, taa soo ay kamid tahay teknolojiyadda cusub, ama kaalmo iyo adeeg ah ee fududaynaya noloshooda.

i) In la horumariyo tababarrada xirfadlayaasha iyo shaqaalaha dadka naafada ah taas oo waafaqsan xuquuqda ku tilmaaman Heshiiskan. Arrintan waxay u ogolaanaysaa dadka naafada ah inay helaan kaalmada ay u baahanyihiin waxayna ballan qaadaysaa xuquuqdooda.

2- Marka aan ka hadlayno xuquuqaha la xiriiro arrimaha dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka, waddan kasta oo qayb ka ah ah Heshiiskan waa inuu sida ugu sarraysa ee awooddiisa dhaqaale ah ugu hawlgalaa, assagoo samaynaayo iskaashi caalami ah, sidi lagu gaari lahaa xuquuqaha aan soo sheegnay iyadoo aan wax loo dhimayn xuquuqaha ku tilmaaman Heshiiskan, kuwaas oo waafaqsan Qaanuunka Caalamiga ah.

3- Marka aan ka hadlayno horumarinta iyo hirgelinta shuruucda iyo siyaasadaha lagu meel marinaayo Heshiiskan iyo habka go'aan gaarista ee khuseeyo dadka naafada ah, Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay si dhow oo muuqata/firfircoon ula tashattaa dadka naafada ah, kuwaas

oo ay kamid yihiin caruruta naafada  ah waana in loo maraa ururada ka wakiilka ah

4- Waa in qodobbada Heshiiskan aanay wax u dhimin wixii shuruuc ah ee wax u taraaya xaqiijinta xuquuqda dadka naafada ah, kuwaas oo horay loogu qoray shuruucda Waddamada ama Shuruucda Caalamiga ah ee hadda ka dhexeeya Waddamada. Waa in aanay jirin wax xakamaynaayo ama xaddidaayo xuquuqul insaanka iyo xorriyaadka la aqoonsanyahay ee ka jira Waddaada Xubnaha ka ah Heshiiskan, iyadoo lagu andocoonaayo in Heshiiskani aanu si buuxda aqoonsanayn xuquuqda iyo xorriyaadka dadka naafada ah.

5- Qodobbada ku qoran Hershiiskani waa in la gaarsiiyaa dhamaan qaybaha waddamada ku shaqeeya habka federaaliga ah, iyadoo aanay jirin wax xakamaynaayo faafinta Sharcigaan.

## Qodobka 5

## Sinnanshaha iyo kala takoorod la'aanta

1- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waxay aqoonsanyihiin in dadka oo dhan u simanyihiin sharciga hortiisa iyo marka ay ku hoos noolyihiin sharciga, ayna si siman u leeyihiin badbaadin iyo faa'iido iyadoo aanay jirin kala takoorid.

2- Waddamada Xubnaha ka ah heshiiskan waa inay mamnuucaan wixii takoorid ah eek u qottoma naafanimada una ballan qaadaan dadka naafada ah inay helaan difaac siman lagana difaacaayo wixii takoorid ah, noocay doonaan ha ahaadaane.

3- Si loo horumariyo sinnaanta, loona baabi'iyo takooridda, Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay qaadaan wixii tallaabo ah ee habboon, taas oo lagu xaqiijinaayo in intii la kari karo ee macquul ah dadka naafada ah la tusiyo ogolaansho.

4- Waa in la qaadaa tallaabooyin gaar ah, kuwaas oo loogu baahanyahay dardar gelinta sidi dadka naafada ah ay u heli lahaayeen xuquuqda ay ula

simanyihiin dadka kale, si ficil ahaan ah, tallaabooyinkaas oo sharciga hadda qoran aanu u arkaynin takoorid.

## Qodobka 6

## Haweenka Naafada ah

1- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waxay garwaaqsanyihiin in haweenka iyo gabdhaha naafada ah ay la kulmaan takoorid farabadan, sidaas darteed, waa in laqaadaa tallaabooyin lagu xaqiijinaayo inay xuquuqdooda buuxda ee xagga xuquuqul insaanka iyo xorriyaadkooda ah u helaan oo ay ula simanyihiin dadka intooda kale.
2- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay qaadaan wixii tallaabo ah ee habboon ee lagu xaqiijinaayo horumarinta iyo awoodsiinta haweenka, kuwaas oo lagu xaqiijinaayo in haweenku si buuxda ugu naaloodaan xuquuqul insaanka iyo xorriyaadka asalka ah.

## Qodobka 7

## Caruurta Naafada ah

1- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay qaadaan tallaabo kasta ee u suurta gelinaysa caruurta naafada ah inay ku naaloodaan xuquuql insaanka iyo xorriyaadka si lasiman caruurta kale.
2- Tallaaba kasta ee khusayso caruurta naafada ah, waa in la siiyaa mudnaanta koobaad maslaxada ugu fiican ee caruurta.
3- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay xaqiijiyaan in caruurta naafada ah inay si xorriyad ku dheehantahay u sheegaan fikradohooda taabanaayo noloshooda, waana in afkaartooda la siiyaa misaan wayn, iyadoo la tixraacaayo da'dooda iyo qaangaarnimadooda, sida caruurta kaleba,

waana in lasiiyaa caruurta naafada ah kaalmo ku habboon si loo xaqiijiyo xuquuqdooda.

## Qodobka 8

## Kor u qaadista wacyiga

1- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay qaadaan tallaabo degdeg ah ee waxtar leh oo khuseeyo arrimaha soo socda:

a) Waa inay kor u qaadaan fahamka guud ee bulshada heer qoys, waa marka aan ka hadlayno dadka naafada ah, sidoo kalena la ixtiraamaa lana horumariyo xuquuqda, sharafta iyo karaamada dadka naafada ah.

b) Waa in lala dagaallamo "Sterotype – xumaan ka aaminid" "prejudice – dhaqamada xun" ee lagula dhaqmo dadka naafada ah, dhaqamadaas oo salka ku haya labka iyo dhedignimada iyo da'da qofka iyo dhinac kasta oo nolosha ah.

c) In kor loo qaado wacyiga iyo waxtarka dadka naafada ah.

2- Si loo gaaro arrimahan:

- a) Waxaa la billaabayaa olole kor loogu qaadaayo wacyiga guud ee dadka:
  - I. Waxaa la billaabayaa in la ogolaado xuquuqda dadka naafada ah.
  - II. Waxaa si wanaagsan loo horumarinayaa fikradda guud ee laga aaminsanyahay dadka naafada ah.
  - III. Waxaa la horumarinayaa aqoonsiga la aqoonsanyahay xirfadaha kala geddisan ee dadku leeyahay, kala mudnaanshaha ay leeyihiin, sidoo kale waxaa la horumarinayaa awoodda waxqabad ee ay leeyihiin dadka naafada ah, iyo waxtarka ay u leeyihiin marka la joogo goobaha shaqada iyo suuqa shaqada.
- b) Waxaa la horumarinayaa kala sarraynta habka waxbarasho, taas oo ay kamid tahay in caruurta billaabaan waxbarashada marka ay yaryihiin,

waxaana kamid ah xurmaynta la xurmaynaayo xuquuqda caruurta naafada ah.

c) In lagu guubaabiyo dhamaan qaybaha kala geddisan ee warbaahinta inay si fiican u tabiyaan arrimaha khuseeyo dadka naafada ah una tabiyaan hab waafaqsan ujeeddada Hesiiskan.
d) In la horumariyo tababarrada ku aaddan waxqabadka iyo fahamka dadka naafada ah iyo xuququdooda.

## Qodobka 9

## Helitaan/Gaaritaan

1- Si loo xaqiijiyo in dadka naafada ah ay u noolaadaan si madaxbanaan ugana qaybqaataan qaybaha kala geddisan ee nolosha si buuxda, Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay qaadaan tallaabooyin ku habboon ee lagu xaqiijinaayo sidi dadka naafada ah ay si siman ugu heli lahaayeen jawiga nololeed ee ay helaan dadka kale, sida helitaanka gaadiidka, xogta, war is-gaarsiinta, adeegsiga teknolojiyadda iyo war is-gaarsiinta jirtaba, sidoo kalena inay fursad ugu helaan wixii kale ee adeegyo dadweyne ah ee jka jira dhulalka magaalooyinka iyo baadiyahaba. Sidoo kale, tallaabooyinkaan waxaa kamid ah timlaamidda la tilmaamaayo lana cirib tiraayo wixii caqabado ah eek a hor istaagi kara dadka naafada ah inay helaan:

   a) Xuquuqda guryaha, waddooyinka, gaadiidka iyo wixii kale ee fududayn ah eek a dhacaayo goobaha shaqada gudohooda iyo bannaankoodaba, goobahaasina waxaa kamid ah guryaha, iskuullada, isbitaallada iyo goobaha shaqada.
   b) Helitaanka wixii war ah, is-gaarsiin ah iyo wixii kale ee adeegyo ah sida adeegsiga waxyaabaha elektoroonigga ah iyo adeegyada degdega ah.

2- Sidoo kale, Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay qaadaan tallaabooyinka soo socda:

   a) Inay horumariyaan, soona saaraan lana socdaan hirgelinta shuruudaha iyo tilmaamaha ugu yar ee lagu gaari lahaa goobaha iyo adeegyada la siinaayo dadka loo qabto.

b) In la xaqiijiyo in hay'adaha gaarka loo leeyahay ee bixiya adeegyada u furan dadweynaha ay tixgeliyaan in dadka naafada ah ay uga faa'iideystaan adeegooda.
c) In la tababaro dadka arrimahan khuseeyaan loona tababaro sidi loogu fududayn lahaa dadka naafada ah inay helaan adeegyada la bixiyo.
d) In la diyaariyo qolal dadka indhoolayaasha ah ay ku aqrin karaan farta "Braille" si fudud oo ay fahmi karaan, iyo foomam ay aqrin karaan.
e) In la siiyo foomam ay ku qoranyihiin qoraallo kaalmaynaayo noloshooda, iyo calaamdo ka turjumaayo una fududaynaayo goobaha dadka naafada ah ay ka heli karaan wærarka.
f) In la horumariyo qaababka kale ee loo kaalmayn karo dadka naafada ah, lana xaqiijiyo sidi ay mar kasta ku heli lahaayeen wixii warbixinno ah ee ay u baahanyihiin.
g) In la horumariyo sidi dadka naafada ah ay ku heli lahaayeen is-gaarsiinta iyo teknolojiyadda casriga sida internet-ka.
h) In la horumariyo qaabki loo horumarin lahaa, loo soo saari lahaa loona qaybin lahaa teknolojiyada ku saabsan warbaahinta iyo sidi teknolojiyaddan loogu iibin lahaa qiimaha ugu yar.

## Qodobka 10

## Xaqqa nolosha

Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waxay xaqiijinaayaa in qof kasta oo bani'aadam ah uu xaq u leeyahay asal ahaan xaquuqda nolosha ee lala dhasho, waana inay qaadaan tallaabo kasta oo loo baahanyahay ee lagu xaqiijinaayo in dadka naafada ahay helaan xuquuqdooda si lasiman dadka kale.

## Qodobka 11

## Marka ay jirto xaalad khatar ah iyo baahi degdeg ah oo bani'aadanimo

Marka ay jirto xaalad khatar ah iyo baahi bani'aadanimo oo degdeg ah, Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay qaadaan, sida uu ku waajib

yeelaayo “Sharciga Caalamiga” ah, iyo “Sharciga Caalamiga ah ee Xilliyada Dagaalka”, iyo “Sharciga Guud ee xquuqul Insaanka” inay qaadaan tallaabooyinka loo baahanyahay ee lagu difaacaayo laguna badbaadinaayo xuquuqda dadka naafada ahmarka ay noloshoodu gasho khatar, sida marka ay jirto colaad hubaysan, ama ay jirto baahi bani’aadanimo oo degdeg ah, ama ay jirto musiibo rabbaani ah.

## Qodobka 12

## U sinnaanshaha sharciga hortiisa.

1- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waxay mar labaad xaqiijinayaan in dadka naafada ahay helaan xuquuq la siman tan dadka kale, meel kasta oo ay joogaan sharciga hortiisa.
2- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waxay aqoonsanyihiin in dadka naafada ahay sharciyan xaq u leeyihiin awood la siman tan ay leeyihiin dadka kale, dhamaan qaybaha nolosha.
3- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay qaadaan tallaabo ku habboon ee dadka naafada ahku helayaan taageero marka ay gudanayaan xuquuqdooda sharci ahaaneed.
4- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay xaqiijiyaan in tallaabo kasta oo la qaado ee ku aadan adeegsiga awoodda sharci ay noqoto mid ku qotonta sidi lagu ilaalin lahaa laguna dhowri lahaa xuquuqda dadka naafada ahsida uu qabo Sharciga Caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka. Tallaabooyinka wax lagu ilaalinaayo waa inay xaqiijiyaan in hawlgalka sharci uu ahaanayo mid ixtiraamayo xuquuqda dadka, rabitaankooda, waxyaabaha dadku doonayo, sidoo kalena ay ka reebbanyihiin masaalix iska hor imaanaayo iyo cadaadis aan loo baahnayn. Sidoo kalena, adeegsigaasi sharci waa inuu ahaado mid miisaaman kuna habboon xaaladda qofka ay arrintu khusayso marka aan ka ahdlayno muddada gaaban. Sidoo kalena, waa in arrimahaan dib u eegis ku sameeyaan qof ama hay’ad sharciyan madax banaan. Tallaabooyinka wax lagu ilaalinaayo waa inay ahaadaan tallaabooyin u dhigma habka dhowrista xuquuquda iyo masaalixda qofka.
5- Qodobkani waxaa kale ee uu waajibinayaa in Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani ay qaadaan tallaabooyin habboon oo lagu xaqiijinaayo in dadka

naafada ahay ku dhaxlaan hanti, kuna maamulaan arrimohooda dhaqaale, sidoo kalena ay dayn ka heli karaan bankiyada (baananka) iyo daymanka kale ee dhaqaale, sidoo kalena waa in la xaqiijiyaa in dadka naafada ahin aan loo diidin hantidooda si kumeel gaar ah (si dad kale ay ugu intifaacaan hantidooda si kumeel gaar ah).

## Qodobka 13

## Helidda Cadaaladda

1- Dhamaan Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay xaqiijiyaan sidi dadka naafada ahay ku heli lahaayeen cadaalad ay ula simanyihiin dadka kale, iyadoo nadaam ahaan iyo da' ahaan la siinaayo garsoor ka turjumaayo da'dooda, sidoo kalena la fududeeyo sidi ay si toos ah iyo si dadbanba uga qayb qadanla haayeen dhamaan wixii garsoor ah ee jira, sida markhaati furista iyo baaritaanka fal-dambiyeedyada.

2- Si loo fududeeyo in dadka naafada ah ay u helaan cadaaladda, Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay siiyaan tababar ku habboon dadka ka shaqeynaayo arrimaha cadaaladda sida booliska iyo shaqaalaha xabsiyada.

## Qodobka 14

## Xorriyadda iyo amaanka qofka

1- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay xaqiijiyaan in dadka naafada ahay ula sinnaadaan dadka kale arrimaha soo socda:
   a) Inay ku naalloodaan xorriyadda iyo amniga qofka
   b) Inaan laga qaadanin hantidooda si sharci darro ah ama kumeelgaar ah.
   c) Waa in wixii hanti ah ee laga qaadaayo dadka naafada ahay waafaqsanaataa sharciga
   d) Waa in aan naafanimada loo adeegsanin hab lagu xalaaleysanaayo hantidooda.

2- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay xaqiijiyaan, haddii la qaado xuquuqda ay leeyihiin dadka naafada ah, inay ula sinnaadaan dadka kale, ayna helayaan ballan qaad, sida uu qabo Xuquuqul Insaanka Caalamiga ah,

waana in loola dhaqmaa si waafaqsan ujeedooyinka iyo mabaadi'da ku qoran Heshiiskan, taas oo ay kamid noqon karto ogolaansho ayaga la ogolaado.

## Qodobka 15

## Ka dhowrista jirdilka, cadowtinimo ula dhaqanka, bani'aadanimo xumo ula dhaqanka ama ciqaabista

1- Waa in qofna aan la jirdilin ama si cadownimo ah aan loola dhaqmin, ama aan la marin ciqaab ana si bani'adanimada ka baxsan, gaar ahaan, waa in aan qofna lagu tijaabin daawo ama arrimo khuseeyo cilmi baaris aydoo qofkaasi aanu raali ka ahayn.
2- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay diyaar gareeyaan wax kasta oo maamul iyo garsoor ah ee looga hortegaayo in dadka naafada ahla jirdilo, la cioqaabo, si bani'aadanimada ka baxsan loola dhaqmo – sida dadka kaleba.

## Qodobka 16

## Ka xor noqoshada si xun ula dhaqanka, xadgudubka iyo wax dhimistaba

1- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay qaadaan tallaabo kasta oo sharci, maamul, bulsho, waxbarasho iyo tallaabo kasta oo lagu badbaadinaayo dadka naafada ah, haddii ay joogan guryohooda ama meelo ka baxsan guryohooda, ama wax kasta oo ka faa'iideysi ama xadgudub ah oo ku salaysan labnimadooda ama dhedignimadooda.
2- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa iany qaadaan tallaabo kasta oo habboon oo looga hortegaayo fal kasta oo ku salaysan ka faa'iideysi, xadgudub, iyo ayagoo xaqiijinaayo sidi lagu heli lahaa kaalmooyinka ku qotoma labnimada, dhedignimada iyo da'da dadka naafada ah, sidoo kalena lagu taageeri lahaa dadka naafada ah, qoysaskooda, dadka dhaqaaleeya, kuwaas oo la siinaayo xog iyo tacliin ku saabsan sidi looga hortegi lahaa xadgudubyada loo geysanaayo dadka naafada ah, sidoo kalena loosoo sheegi lahaa haddii xadgudubyo lagula koco ayaga ama wax loo dhimaayo. Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay maskaxdooda ku hayaan

sidi lagu xaqiijin lahaa badbaadada dadkaan la siinaayo inuu yahay mid tixgelinaayo da'dooda, dhedignimadooda, labnimadooda iyo naafinimadooda.

3- Si looga hortago nooc kasta oo si xun uga faa'iideysi, xadgudub iyo awood-sheegad ah, Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay xaqiijiyaan in dhamaan wixii fududayn iyo qorshe ah ee loogu talo galay dadka naafada ahay mas'uuliyiin madaxbanaan si joogto ah u kormeeraan.

4- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay qaadaan tallaabo kasta oo ku habboon laguna xaqiijinaayo sidi dadka naafada ahlagu horumarin lahaa xaaladdooda muuqaal, maskax, nafsi ahaan, soo kabsashada nafsi ahaan iyo sidi marka ugu dambaysa ay bulshada uga mid noqon lahaayeen (waa kuwa xadgudubka lagula kacay). Dib usoo noolaynta iyo dib ugusoo darista bulshada dadka ay dhibaatadu gaartay waa inay ku timaado jawo ku dhisan horumarinta caafimaadka qofka, dhaqaalihiisa, xurmada qof ahaaneed, sharaftiisa iyo madaxbanaanidiisa qof ahaneed, sidoo kalena jawigaasi uu ahaado jawi tixgelinaayo labnimada, dhedignimada, da'da iyo baahida qofka.

5- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay dejiyaan shuruucdi iyo siyaasadihi xaqiijin lahaa, waa haddi ay dhacaan xadgudubyo iyo awood sheegad lagula kacay dadka naafada ah, lagusoo sheegi lahaa wixii xadgudubyo ah ee ka dhan ah dadka naafada ah, lagu baari lahaa, marka dambana meeshii ku habboon lagu maxkamadayn lahaa, waana in shuruucdani si gaar ah diiradda u saaraan shuruucda iyo siyaasadaha khuseeyo arrimaha haweenka iyo caruurta.

## Qodobka 17

## Dhowrista sharafta qofka

Qof kasta oo naafo ah wuxuu xaq u leeyahay in la ixtiraamo xaqiisa/xaqeeda jir ahaan iyo maskax ahaan si la simad dadka kale.

## Qodobka 18

## Xoriyadda dhaqdhaqaaqa iyo jinsiyadda

1- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay aqoonsadaan xoriyadda qofka naafo ah uu u leeyahay dhaqdhaqaaqa, doorashada meesha uu degaayo iyo jinsiyadda uu qaadanaayo, waana inay ahaato si la siman dadka kale, taas oo ay ku jiraan dadka naafada ah, Iyadoo la xaqiijinaayo in dadka naafada ay leeyihiin:
   a) Inay xaq u leeyihiin helitaanka iyo bedelidda jinsiyaddooda, si ku meel gaar ahna aan loogu diidi karin dhalashadooda, Iyadoo loo cuskanaayo naafanimo darteed.
   b) Inaan loogu diidin naafonimo darteed awoodda ay u leeyihiin inay ku helaan, kuna milkiyaan dokumintiyo la xiriiro dhalashadooda ama dokumentiya kale oo qeexaayo qof ahaantooda, ama ay adeegsadaan hababka kale ee caadiga ah ee la maro, sida arrimaha socdaalka, taas oo dalbanayso adeegsiga xaquuqda dhaqdhaqaaqa.
   c) Inay xaq u leeyihiin inay ka tagaan waddan kasta uu ku jiro kan ay u dhasheen.
   d) Waa inaan loogu diidin, si ku meel gaar ah, xaqqa ay u leeyihiin inay galaan waddan, Iyadoo loo adeegsanaayo naafanimadooda .

2- Caruurta naafada ahwaa in la diiwaan geliyaa isla marka ay dhashaan, waxayna xaq u leeyihiin in la siiyo magic marka ay dhashaan, waxayna xaq u leeyihiin inay helaan jinsiyad, sidoo kalen waxay xaq u leeyihiin inay ogaadaan waalidiintooda runta ah, kana helaan xanaano inti la kari karo.

## Qodobka 19

## U noolaansho si madaxbanaan, Iyadoo laga mid yahay bulshada

Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waxay aqoonsanyihiin xaqqa dadka naafada ahu leeyihiin inay la noolaadaan bulshada, sidoo kalena ay la lahaadaan kala doorasho siman, sidoo kalena la qaado tallaabo wax lagu qabanaayo kuna

qotonta sidi lagu fududayn lahaa sidi dadka naafada ahugu naalloon lahaayeen xaqqaas, si buuxdana uga mid noqon lahaayeen bulshada. Xuquuqdaasina waxaa kamid ah:

a) Dadka naafada ahwaa inay helaan fursad ay ku kala dooranayaan halka ay ku noolaanayaan iyo dadka ay la noolaanayaan, taas oo ay kala simanyihiin dadka kale, laguna khasbin in meel gaar ah ay ku noolaadaan.
b) Dadka naafada ahwaa inay fursad u helaan kaalmooyin farabadan, kana helaan guryaha ay deganyihiin iyo bulshada ay la noolyihiin, kaalmadaasi waxaa kamid ah tan ayaga qof ahaantooda loogu kaalmaynaayo sidi ay u noolaan lahaayeen ugana mid noqon lahaayeen bulshada, loogana dhowri lahaa faquuq bulshada dhexdeeda ah.
c) Dadka naafada ahwaa inay adeegsan karaan goobaha umadda loogu adeego iyo goobaha kale ee dadweynaha, si ay ula simanyihiin dadka kale, waana in laga jawaabaa baahidooda.

## Qodobka 20

## Guur-guuridda qof ahaaneed

Waddamadu waa inay tallaabo waxtar leh u qaadaan sidi lagu xaqiijin lahaa guur-guuritaanka qof ahaaneed ee dadka naafada ah, inti la kari karo, ayna si madaxbanaan u guur-guurayaan. Xuquuqdaan waxaa kamid ah:

a) In la fududeeyo guur-guurista qof ahaaneed ee dadka naafada ahsi waafaqsan rabitaankooda waqtiyeysan, ayna ku guuraan kharash ay awoodi karaan.
b) In loo fududeeyo dadka naafada ahsi guuritaankoodu u noqon lahaa mid ay nolo ku jirto oo heer sare ah, una adeegsan lahaayeen adeegyada casriga ah iyo teknolojiyada, ayna ku guuraan kharash ay kari karaan.
c) In la siiyo tababar ku aaddan xirfadda dhaqdhaqaaqa dadka naafada ah, tababarkaasina la siiyo dadka aan naafada aheyn iyo dadka kale ee xanaaneyntooda ka shaqeeya.

d) In lagu dhiirri geliyo hay'adaha soo saara qalabka loo adeegsado dhaqdhaqaaqa iyo qalabyada kaleba ee teknolojiyada ah inay tixgeliyaan sidi ay u fududeyn lahaayeen dhaqdhaqaaqyada kala duwan dadka naafada ah.

## Qodobka 21

## Xoriyadda hadalka, fekradda iyo helitaanka wararka

Dhamaan Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay qaadaan tallaabooyin ku habboon oo lagu xaqiijinaayo in dadka naafada ahay adeegsan karaan xaqqa ay u leeyihiin xorriyatul qowlka iyo fikrad dhiibashada, sidoo kalena waa iany helaan xorriyad ay ku raadsan karaan kuna heli karaan xog iyo warar dhexdhexaad ah, sida dadka kaleba, ayagoo adeegsanaayo nooc kasta oo is-gaarsin ay oo ay rabaan, taas oo waafaqsan qodobka 2aad ee Heshiiskan. Waxaana arrimahan kamid ah:

a) In dadka naafada ahla siiyo warka ama xogta guud ee loogu talo galay dadweynaha, si aan xakamayn lahayn, ayna adeegsadaan teknolojiyada ku habboon dadka naafada ah, warkana helaan saacadda ay rabaan Iyadoo aan laga qaadaynin kharash dheeraad ah.
b) In la ogolaado loona fududeeyo adeegsiga hadalka ku dhisan calaamadaha, farta dadka indhoolayaasha ah, habka isgaarsiinta kala geddisan iyo qaababka kala geddisan ee isgaarsiinta oo iyagu ay doortaan, si warkooda ugusoo gudbinayaan marka ay mucaamalaad rasmi ah la samaynayaan dadka.
c) In lagu guubaabiyo hay'adaha gaarka loo leeyahay ee bixiya adeegga guud ee dadweynaha sida internetka inay siiyaan xogta iyo adeegga dadka naafada ahay rabaan Iyadoo loo maraayo wixii hab macquul ah ee jira.
d) In lagu guubaabiyo hay'adaha warbaahinta, sida kuwa wararka ku faafiyo internetka inay adeegooda gaarsiiyaan dadka naafada ah.
e) In la aqoonsado lana horumariyo adeegsiga luqadda ku dhisan calaamadaha.

## Qodobka 22

## Xurmaynta amuuraha khaaska ah

1- Waa in qof naafo ah, meeshuu rabo ha deganaado ama haku noolaadee, aan la fara gelin, si kumeelgaar ah ama si kalaba, arrimihiisa ama arrimeheeda gaarka ah, sida sida qoyskiisa ama qyskeeda, gurigiisa ama gurigeeda, wixii farriin qoraal ah ee ayaga ku socda, ama nooc kasta oo war is-gaarsiin ah, sidoo kalena waa inaan sharafta iyo karaamada qofka naafo ah aan lagu qaadin weerar sharci darro. Dadka naafada ahwaxay sharci ahaan xaq u leeyihiin in laga badbaadiyo weerarada ama faragelinta aan soo sheegnay oo kale.
2- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay dhowraan arrimaha gaarka ah ee qofku leeyahay sida caafimaadkiisa, iyo in qofka xumaantiisa aan dib loo sii raac-raacin.

## Qodobka 23

## Xurmaynta guriga iyo qoyska

1- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay qaadaan tallaabo waxqabad leh oo ku habboon, taas oo lagu baabi’inaayo faquuqidda dadka naafada ah, sida marka arrimo guur, qoys, xiriir, waalidnimo ay samaysanaayaan, waana inay ula sinnaadaan dadka kale. Sidaas darteed, Waddamadu waa inay xaqiijiyaan:
    a) Xuquuqda dhamaan dadka naafada ahee gaaray da’ada guurka, doonayana inay guursadaan, rabaanna inay samaystaan qoys si xor ah, Iyadoo la garwaaqsanaayo ogolaanshaha qofka uu rabo/rabto inuu/inay guursado/guursato.
    b) Xuququda dadka naafada ahay si xor ah oo mas’uuliyadi ku dheehantahay ay ugu go’aansanayaan tirada iyo kala dheeraynta caruurtooda, sidoo kalen ay ku helayaan wixii xog ah ee u qalma da’dooda, lana baraa tacliinta ku saabsan arrimaha taranka iyo kala

dheeraynta dhalmada, sidoo kalena loo suurto geliyaa inay adeegsadaan xuquqahaas oo dhan.

c) Dadka naafada ahiyo caruurtaba waa inay lahaadaan xaqqa xafidaadda awoodooda wax-dhalid, sida dadka kaleba.

2- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskani waa inay xaqiijiyaan xaqqa iyo mas'uuliyadda saaran dadka naafada ahmarka laga hadlaayo waalid ahaanshohooda, xafidaadooda, waardiyayntooda, dad ku aaminidooda, qaadashada ay qaadanayaan caruurta, ama hay'adaha lamidka ah, waa waddanki ay ka jiraan shuruucdan oo kale. Marka laga hadlaayo dhamaan arrimaha aan soo sheegnay waa in mudnaanta koobaad la siiyo halka ay ku jirto danta caruurta. Waddamadu waa inay waalidiinta naafada ahay siiyaan kaalmo ku habboon marka ay gudanayaa mas'uuliyadda ka saaran xanaanaynta caruurtooda.

3- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay xaqiijiyaan in caruurta naafada ahinay helaan nolol qoys. Si loo helo xuquuqdan, loogana hortago qarinta, ka cararidda, dayacaadda iyo faquuqidda caruurta naafada ah, Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay hayaan xog dhamaystiran iyo adeeg iyo kaalmo ay siiyaan caruurta naafada ahiyo qoysaskooduba.

4- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay xaqiijiyaan inaan cunugga la qaadin waalidkiis haddi aanu raali ka ahayn, haddii ay jirto dowlad xaq sharci ah u leh go'aankaas ma ahane, taas oo la waafajinaayo shuruuc iyo hab maamul jideynaayo in canugga laga soo wadaayo waalidkiis ay ku qotonto maslaxada cunugga. Si kasta oo xaaladdu tahay, waa inaan ncunugga iyo waalidkiis aan la kala kaxayn Iyadoo loo eegaayo naafanimada cunugga ama labada walid ama midkood uu naafo yahay.

5- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskan, waa haddii waalidiinta dhalay cunug naafo ah oo aanay xanaanayn karin, waa inay qaadaan tallaabo kasta oo cunuggu uga helaayo xanaano qeybaha kale ee qoyskiisa, haddii taasi ay dhici weysana, qof dhaqaaleeyo looga raadiyo bulshada qoyskiisu ku dhex noolyahay.

## Qodobka 24

## Waxbarashada

1- Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay aqoonsadaan xaqqa qofka naafo ah uu u leeyahay waxbarashada. Iyadoo maanka lagu haayo sidi lagu heli lahaa xaqqaan uu cunuggu kula lahaanaayo caruurta kale ee aan naafada aheyn, Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay xaqiijiyaan hab waxbarasho oo loo simanyahay dhamaan heerarka nolosha oo dhan. Noloshuna waa inay guud ahaan ku aaddanaataa:

   a) Horumarinta awoodda bani'aadamka iyo qiimaha qofnimo, sidoo aklena lagu xoojinaayo xurmaynta bani'aadamka iyo kala duwanaanshaha bani'aadamka.
   b) In la horumariyo awoodda dadka naafada ahiyo shakhsiyaddooda, maskaxdooda, jir ahaantooda, hal abuurkooda, ilaa iyo inti la kari karo.
   c) In loo suurto geliyo dadka naafada ahinay si muuqato uga mid noqdaan bulsho xor ah.

2- Si loo helo xorriyaddaan, Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay xaqiijiyaan:

   a) In dadka naafada ahaan laga saarin habka waxbarashada guud iyadoo loo faquuqayo naafanimadooda darteed, sidoo kalena, caruurta naafada ahwaa inaan loo diidin waxbarashada asaasiga ah ee xorta ah khasabkana ah, iyo waxbarashada dugsiga sare, iyadoo faquuqaas lagu salaynaayo naafanimadooda .
   b) Qofka naafo ah waa inuu fursad u helaa waxbarasho tayo leh, xor ah, asaasi ah iyo weliba tan dugsiga sare, si la siman caruurta bulshada ay la noolyihiin.
   c) Intii macquul ah ee la kari karo in la daboolo qofka baahidiisa.
   d) Caruurta naafada ahwaa iany helaan taageerada ay u baahanyihiin inta ay ku dhex jiraan habka waxbarashada guud, si waxbarashadooda loogu fududeeyo si tayo leh.
   e) Waa in la qaadaa tallaabooyin waxtar leh oo lagu kaalmaynaayo shakhsiyaadka naafada ahsi ay uga faa'iideystaan tacliin ahaan iyo

bulsho ahaanba una gaaraah horumar, taas oo waafaqsan ujeedada guud ee loo dhanyahay.

3- Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay u suurto geliyaan dadka naafada ah xirfado lagu horumarinaayo noloshooda si loo fududeeyo inay si buuxda oo siman uga qayb galaan arrimaha waxbarashada iyo bulshada inteeda kaleba. Sidaas darteed, Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay qaadaan tallaabooyinka soo socda:
    a) Barashada farta indhoolayaasha, far kale, habab kale iyo noocyo kale oo war tabin ah, waa inay bartaan habab kale oo war isgaarsiin lana baraa xirfado ay u adeegsadaan guur-guurista, lana fududeeyaa taageerada ay ka helayaan dadka jiilkooda ah iyo tababariddooda.
    b) Waa in la fududeeyaa barashada farta calaamadaha ah iyo horumarinta iyo luqadda ay ku wada hadlaan dadka dhagoolayaasha ah.
    c) In la xaqiijiyo in waxbarashada dadka, gaar ahaan caruurta indhoolayaasha ah, dhagoolayaasha ah, amaba indhoole iyo dhagoole isla ah, in la baro luqadaha iyo hababka ugu habboon ee war tabinta, loona diyaariyo jawi ay aad wax ugu baranayaan kuna horumarayaan bulsho ahaan.
4- Si loo xaqiijiyo helitaanka xuquuqdan, Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay u qaadaan tallaabo ku habboon oo ay ku shaqaalesiinayaan macallimiin (ay kamid yihiin kuwo naafada ah) oo aqoon u leh luqadda dadka dhagaha iyo indhaha la’ iyo inay tababaraan dad xirfadleyaal ah oo ka shaqayn kara dhamaan heerarka kala geddisan ee waxbarashada. Waxbarashada noocaan oo kale ah waa inay ku jirtaa ka warqabidda baahida dadka naafada ahiyo isticmaalka hababka kala geddisan ee waxbarashada eek u habboon dadka naafada ahiyo qalab lagu taageero waxbarashada dadka naafada ah.
5- Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa iany xaqiijiyaan in dadka naafada ahay ka qaybgeli karaan waxbarashada dadka waaweyn iyo barashada xirfadaha iyo waxbarasho waqti dheer iyadoo aan lagu faquuqin naafanimadooda . Sidaas darteed Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay u sameeyaan dadka naafada ahogolaansho ilaa iyo inta la kari karo.

## Qodobka 25

## Caafimaadka

Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waxay aqoonsanyihiin in dadka naafada ahay xaq u leeyihiin ku naaloonshada caafimaad heerkiisu aad u sarreeyo iyadoo aan lagu faquuqin naafanimadooda . Sidaas darteed Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay qaadaan wixii tallaabo ah ee habboon ee lagu xaqiijinaayo in dadka naafada ahay ku helayaan adeeg caafimaad oo ku qotoma labnimadooda ama dhedignimadooda. Sidoo kalena, Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay:

a) Siiyaan dadka naafada ahhab daweyn caafimaad oo tayo leh oo waafaqsan heerka la rabo, kharash la'aan ah, ama la awoodo kharashkiisa, iyo qorshooyinka kale ee loogu talo galay dadka, qorshayaashaas oo ku shaqo leh taranka iyo galmada, iyo kor u qaadidda wacyiga guud ee dadku u leeyahay arrimaha caafimaadka.
b) In adeegyada caafimaad ee aan soo sheegnay la siiyo dadka naafada ah, maadaama naafada ah, sidoo kalena la sheego xanuunnada iyo cudurrada ay qabaan wakhtiga ku habboon, sidoo kalena la siiyo adeegyo ayaga loogu talo galay oo yareynaayo in cudurkoodi sii kordho sida caruurta xanuunsan iyo dadka waayeellada ah.
c) In la siiyo adeegyada caafimaad, ilaa iyo inti la kari karo, bulshooyinka ay ka tirsanihiin dadkaan, sida kuwa ku nool baadiyahay.
d) Xirfadleyda caafimaadka waxaa looga baahanyahay in xanaanada ay siinayanaa dadka naafada ahay lamid noqoto tan la siiyo dadka kale, waana inay ahaato lacag la'aan, looguna sheego korna loogu qaadaayo wacyiga guud ee xuquuqul insaanka, loogana jawaabaayo baahida dadka naafada ahay u qabaan tababarrada, korna loogu qaadaayo habraaca caafimaadka guud iyo kan gaar ahaaneed.
e) In lagu mamnuuco faquuqidda dadka naafada ahmarka ay raadsanayaan caymis caafimaad iyo mid nololeed, waa halkii uu sharcigaasi ka jiro.

f) In laga hortago takooriida iyo diidmada adeegga caafimaad ama cuto ama dareere loo diidaayo qofka naafo ah iyadoo lagu marmarsiyoonaayo naafanimada qofka.

## Qodobka 26

## Baxnaanin iyo dhaqan-celin

1- Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay qaadaan tallaabooyin waxtar leh oo habboon oo loogu suurto gelinaayo dadka naafada  ah inay helaan xadidaanna madaxbanaanidooda, intii ka suurto gal ah, taageero jir ahaaneed, maskax ahaaneed, bulsho iyo awoodohooda kale ee gaarka ah, ayagoo si buuxda uga qayb qaadanaayo qaybaha kala geddisan ee nolosha. Helidda arrimahaan waxaa lala kaashanaa taageero laga helo dadka ay isku jiilka yihiin dadka naafada ah. Si arrintaan loo helo, Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay diyaariyaan, xoojiyaan, sameeyaanna adeegyada ku qotoma baxnaaninta iyo dhaqancelinta, gaar ahaan dhinaca caafimaadka, shaqo helista, waxbarashada, adeegyada bulshada, si adeegyadaasi ay u billowdaan:

   a) Billowga nolosha hore, ayna ku salaysnaadaan baahida iyo awoodaha kala geddisan ee qofka.
   b) In la taageero ka qayb galka iyo kamid ahaanshaha bulshada iyo dhamaan qaybaha kala geddisan ee nolosha, looga na qayb galo si ikhtiyaari ah, looguna diyaariyo dadka naafada ahbulshadooda dhexdeeda ilaa iyo inti suurto gal ah.

2- Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa iany billlaabaan, horuna mariyaan shaqaalaha u adeego dadka naafada ahsi ay u helaan adeegyo ku qotoma baxnaanin iyo dhaqancelin.

## Qodobka 27

## Shaqada iyo shaqaalaynta

1- Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waxay aqoonsanyihiin xaqa dadka naafada ahay u leeyihiin inay helaan shaqooyin, taas oo ay ula simanyihiin

dadka aan naafada aheyn. Waxaana xuquuqdaan kamaid ah inay helaan shaqo ay nolol kasamaystaan una doortaan si xor ah, shaqadaas oo laga ogolyahay suuqa shaqo helista, waana inuu ahaado jawi shaqo oo furan, loo dhanyahay, ayna heli karaan dhamaan dadka naafada ah. Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay ilaaliyaan, horumariyaanna xaqqa shaqada, kuwaas oo ku naafooba xilliyada ay shaqada ku guda jiraan, lagana qaado tallaabo ku habboon, loona diyaariyo sharci. Sidaas darteed waa in:

a) La manuucaa takoorid ku dhisan naafanimo marka laga hadlaayo dhamaan wixi khuseeyo shaqo, sida xaaladaha qoritaanka shaqada, soo ijaarashada, shaqo-siinta, shaqada oo la wado, xirfadda oo la horumariyo iyo xaalado caafimaad oo lagu shaqeeyo.
b) In la dhowro xaqqa ay leeyihiin dadka naafada ah, si la siman dadka kale, xaqqa ay u leeyihiin cadaaladda iyo xaalad shaqo oo ku habboon, waxaana arrimahaan kamid ah inay si siman uga qayb galaan wixii fursado ah ee jira, loona ilaaliyo caafimaadkooda iyo xaaladdooda shaqo, lagana ilaaliyo in lagu dhibo goobta shaqada, waxna laga qabto cabashadooda.
c) In la xaqiijiyo in dadka naafada ahay adeegsadaan ururadooda shaqaalaha, sida dadka kaleba.
d) Dadka naafada ahwaa inay fursad muuqato u helaan tababarka iyo farsamooyinka guud, adeegyada meelaynta iyo in si joogto ah u helaan tababarro.
e) In la horumariyo fursadda shaqo-siin iyo horumarinta xirfadaha shaqo ee dadka naafada ah, loogana baahanyahay suuqa shaqada, lagana kaalmeeyo sidi ay ku raadin lahaayeen, ku heli lahaayeen kuna xafidan lahaayeen shaqada.
f) In la horumariyo shaqooyinka dadka naafada ah ay sida gaarka ah, samaynta ganacsiga yaryar, samaynta iskaashatooyin iyo in qofku samaysto shaqo uu gaar u leeyahay.
g) In dadka naafada ahlaga hawlgeliyo xafiisyada dowladda.
h) In la horumariyo shaqaalaysiinta dadka naafada ahlaga shaqaaleysiinaayo meheradaha gaarka loo leeyahay iyadoo la adeegsanaayo siyaasadaha iyo tallaabooyinka ku habboon. Waxaana

tallaabooyinkan kamid ah in si ogaal ah loogu suubiyo qorshooyin, dhiirri gelin iyo tallaabooyin ayaga lagu horumarinaayo.

i) In si macquul ah looga soo dhoweeyo dadka naafada ahgoobaha shaqada.
j) In la horumariyo sidi dadka naafada ahay waaya aragnimo uga heli lahaayeen suuqa furan ee shaqada.
k) In la horumariyo sidi dadka naafada ahay u heli lahaayeen tababarro ay ku xafitaan shaqadooda kuna noqdaan xirfadlayaal, marka dambana dib ugusoo noqdaan goobaha shaqada.

2- Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay xaqiijiyaan in dadka naafada ahaan loogu shaqaysanin si ku dhisan is adoonsi, si xoog ahna aan loogu shaqaysanin.

## Qodobka 28

## Helitaanka nolol caadi ah iyo bulshada oo badbaadin laga helo

1- Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waxay aqoonsanyihiin xaqqa dadka naafada ahay u leeyihiin inay helaan nolol wanaagsan oo caadi ah iyaga iyo qoysaskoodaba, noloshaasi waxaa kamid ah inay helaan cuto ku filan, dhar ku filan, guryo iyo in noloshoodu si joogto ah u samayso horumar, ayna qaadaantallaabooyin ku habbaan oo lagu ilaalinaayo laguna horumarinaayo xuquuqda dadka naafada ahIyadoo aan lagu takooraynin naafanimadooda .

2- Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waxay aqoonsayihiin xaqqa dadka naafada ah ay u leeyihiin inay badbaadin ka helaan bulshada iyo inay ku naaloodaan xuquuqdaas iyadoo aanay jirin wax takoorid ah oo ku saabsan xuquuqdaas, sidoo kalena la qaado tallaabo ku habboon oo lagu ialalinaayo laguna horumarinaayo xuquuqdaan, waxaana kamid ah tallaabooyinkaas:

a) In la xaqiijiyo in dadka naafada ahay u heli lahaayeen biyo nadiif ah sida dadka kalena, ayna u helaan adeeg ku habboon ayaga oo ay heli karaan, loona diyaariyo qalab iyo kaalmo kale oo wax ka taraaya naafanimadooda.

b) In la xaqiijiyo in dadka naafada ah, gaar ahaan haweenka iyo gabdhaha naafada ahiyo dadka duqowda ah ee naafada ahinay helaan qorshe ayaga lagu badbaadinaayo laguna yaraynaayo saboolnimadooda.
c) In loo suurto geliyo dadka naafada ahiyo qoysaskooda eek u nool xaalad faqrinimo inay dowladda ka helaan kaalmo, waxaana kaalmadaas kamid ah inay helaan tababar ku filan, la talin, kaalmo dhaqaale iyo xanaano wanaagsa.
d) In la xaqiijiyo sidi dadka naafada ahay ku heli lahaayeen mashruuca guriyaynta dadweynaha.
e) In dadka naafada ahay ula sinaadaan dadka kale xuquuqda hawlgabnimada iyo faa'iidooyinka kaleba.

## Qodobka 29

## Ka qaybgalka nolosha siyaasadeed iyo tan dadweynaha

Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay ballan qaadaan gaaritaanka xaqqa siyasadeed ee ay leeyihiin dadka naafada ah, waana inay ilaaliyaan qodobadan:

a) Inay xaqiijiyaan in dadka naafada ahay si dhab ah uga qayb qaataan nolosha siyaasadeed iyo tan dadweynaha, si toos ah ama si dadban ayagoo usoo maraayo qof ay usoo xil saarteed, xaqasina waxaa kamid ah in qofka naafada ah inuuu wax doorto lana doorto, waana inay ula sinnaadaan dadka intiisa kale.
    I. In la xaqiijiyo in qalabka codaynta, goobaha iyo qalabka kale ee la adeegsado ay noqdaan kuwo ku habboon dadka naafada ah, si fududna ku gaari karaan lana fahmi karo.
    II. In la dhowro xaqqa dadka naafada ahay u leeyihiin inay si qarsoodi ah wax u doortaan, ayna ka qayb qaataan aftida dadweynaha, iyadoo aanay jirin wax hanjabaad ah, sidoo kalena ay u istaagaan doorasho, si buuxdana u qabtaan xafiis, kana shaqeeyaan dhamaan hawlaha dowladda heer kasta, ayagoo helaayo kaalmada iyo teknolojiyadda cusub eek u habboon.

III. In la ballan qaado xorriyatul qowlka dadka naafada ahmaadaama ay yihiin cod bixiyeyaal. Si arrintaan loo helo waa in laga kaalmeeyo sidi ay ugu codeyn lahaayeen qofka ay rabaan.

b) In si waxtar leh loo horumariyo jawi dadka naafada ahay si xoog leh uga qayb qaadan karaan, kuna maamuli karaan xafiisyada dadweynahay iyadoo aanay jirin wax takoorid ah, ulana simanyihiinndadka intiisa kale, laguna dhiirri geliyo inay ka qayb qaataan arrimaha dadweynaha sida:

I. Inay qayb ka noqdaan ururada aan dowliga ahayn iyo kuwa kale ee khuseeyo arrimaha dadweynaha iyo nolosha siyaasadeed ee wadanka iyo hawlaha iyo maamulka ay u qabanayaan ururadad siyaasadeed.

II. Inay sameystaan kuna biiraan ururada ay leeyihiin dadka naafada ahsi loo dhowro xuquuqda dadka naafada ahee heer caalami, heer gobol iyo heer wadan iyo heerarka hoose ee nolosha.

## Qodobka 30

## Ka qaybgalka nolosha bulshada, naaloonshada iyo isboortiga

1- Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waxay aqoonsanyihiin xaqqa dadka naafada ahay u leeyihiin inay  si siman dhaqan ahaan uga qayb qataan nolosha, sidoo kalena ay qaadaan wixii tallaabo ah ee loo baahanyahay ee lagu xaqiijinaayo in dadka naafada ahay:

a) Inay helaan qalabka loo adeegsado dhaqanka loona diyaariyo hab ay uga faa’iidaysan karaan.

b) Inay fursad u helaan barnaamijyada ka baxa telefishinnada iyo arrimaha kale ee dhaqanka, loona diyaariyo hab ay ku gaari karaan.

c) Inay tagaan goobaha lagu soo bandhigaayo arrimaha dhaqanka iyo adeegyada kaleba sida tiyaatarrada, matxafyada, maktabadaha iyo goobaha adeegga dalxiiska iyo inay fursad u helaan, inti suurto gal ah, goobaha ay ku yaallaan taallooyinka taariikiga ah iyo goobaha kale ee dhaqanka iyo caadada muhiimka u ah.

2- Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay qaadaan tallaabo klu habboon oo u suurto gelinayso dadka naafada ahinay horumariyaan adeegsadaanna hal-abuurnimada maskaxdooda, ruwaayado samaynta iyo

awoodda garaadkooda oo ay ugu faa'iideynayaan nafsaddooda iyo bulshada inteeda kale.

3- Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay qaadaan wixii tallaabo ah ee habboon, ayagoo raacaayo Sharciga Caalamiga ah, in shuruucda ilaalinta Xuquuqda Qoraalka iyo Fanka gaarka loo leeyahay aanay caqabad ku noqonin ama aanay faquuqin dadka naafada ah.
4- Dadka naafada ahwaxay xaq u leeyihiin, ayagoo la siman dadka kale, in la aqoonsado, lana taageero dhaqanka ayaga gaarka u ah iyo luqadoodaba sida dhaqanka dadka dhagaha la' iyo luqadda ay wax iskugu tilmaamaan.
5- Iyadoo maanka lagu hayo in dadka naafada ahay ka qayb galaan arrimaha maaweelada iyo madadaalada iyo jimicsiga, si la siman dadka intiisa kale, ayaa Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waxay qaadayaan tallaabooyinka soo socda:
    a) Waxay dhiirri gelinayaa, horumarinayaanna sidi adadka naafada ahay si buuxda uga qayb geli lahaayeen arrimaha guud ee cayaaraha, noocii ay doonaan ha ahaadaaane.
    b) In la xaqiijiyo in dadka naafada ahay diyaar gareeyaan, horumariyaan, kana qayb galaan cayaaro u gaar ah dadka naafada ah, maaweelo iyo madadaalo iyo jimicsi, sidaas darteedna la dhiirri geliyo sidi lagu heli lahaa qalab, tababarro iyo dhaqaale u suurto gelinaayo arrimahaas, ayagoo dadka intiisa kale ula siman.
    c) In la xaqiijiyo in dadka naafada ahay tagaan goobaha cayaaraha, maaweelada iyo dalxiiska.
    d) In la xaqiijiyo sidi caruurta naafada ahay uga qayb geli lahaayeen ruwaIyadaha, madadaalada, ciyaaraha iyo arrimaha kaleba ayagoo ula siman caruurta intooda kale, cayaarahaasina waxaa kamid ah kuwa lagu qabto sikuulada.
    e) In la xaqiijiyo sidi dadka ay uga faa'iidayusan lahaayeen adeegga ururada ku shaqada leh maaleellada, madadaalada, ciyaara iyo hawlaha jimicsiga.

## Qodobka 31

## Tirakoobka iyo ururinta xogta

1- Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa iany soo ururiyaan xog ku habboon sida tirakoon iyo cilmi baaris u suurto gelinaayo sidi ay ku dejin lahaayeen kuna hirgelin lahaayeen siyaasado lagu taageeraayo Heshiiskan. Habka lagusoo ururinaayo xogta iyo arimahaan waxaa kamid ah:
   a) In loo hogaansanaado shuruucda degsan ee ilaalinayso xogta qarsoodiga ah, dhowraysana arrimaha gaarka ah ee dadka naafada ah.
   b) In loo hogaansanaado dhaqamada la ogolyahay heer caalami ee ilaalinaayo xuquuqul insaanka iyo xorriyaadka asaasiga ah, iyo mabaad'da guud iyo hab-raaca guud ee loo adeegsanaayo xog ururinta iyo tirakoobka.
2- Xogta lasoo ururiyo ee waafaqsan qodobkan waa in loo baabi'iyaa sida ugu habboon loona adeegsadaa hab lagu kaalmaynaayo hirgelinta waajibaadka saaran  Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan inay ku gartaan, waxna uga qabtaan culaysyada saaran dadka naafada ahmarka ay gudanayaan waajibaadkooda.
3- Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa iany qaadaan mas'uuliyadda lagu baabi'inaayo xogta ama tirakoobkan, waana inay la wadaagaan dadka naafada ahiyo kuwa kaleba.

## Qodobka 32

## Iskaashiga caalamiga ah

1- Wadamada Xubnaha ah waxay aqoonsanyihiin muhiimadda ay leedahay iskaashiga caalamiga ah iyo horumarintiisa, kaas oo lagu taageeraayo dadaalka heerka qaran ah, laguna xaqiijinaayo ujeedada Heshiiskani uu leeyahay. Sidoo kale waxay fulinaayaan tallaabooyin ku habboon arrimahaan, tallaabooyonkaas oo ay ka qaadaayaan dhexdooda iyo wadamada xubnaha ka ah. Sidoo kalena, waxay iskaashi la sameeynayaa ururada caalamiga ah, kuwa heer gobol iyo bulshada caalamiga ah, gaar ahaan ururada ay leeyihiin dadka naafada ah. Tallaabooyinkan waxaa kamid noqon kara:

a) In la xaqiijiyo in iskaashiga caalamiga ah, oo ay kamid tahay qorshayaasha caalamiga ah ee horumarinta, ay ahaadaan kuwo loo dhantahay, ayna dadka naafada ah u helaan awood ay ku gaaraan.
b) In la fududeeyo lana taageero kor u qaadidda wacyiga iyo waxqabadka iyadoo la adeegsanaayo isweydaarsiga xogta iyo wixii waayo aragnimo ah ee jira, tababarrada iyo dhaqamada kale ee suubban.
c) In la fududeeyo iskaashiga ku saabsan samaynta ku saabsan cilmi baarista iyo sidii lagu gaari lahaa culuumta seyniska iyo tan farsamo.
d) In la sameeyo, intii la kari karo, kaalmo farsamo iyo dhaqaale, iyadoo la fududeynaayo wixii kaalmo ah ee farsamo ahaan la heli karo, iyadoo loo maraayo habka isku gudbinta aqoonta.

2- Sharciyada ama tilmaamaha ku jira qodobkan waxba uma dhimayaan waajibaadka saran waddan kasta ee uu ku fulin lahaa waajibaadka ka saran fulinta Heshiiskan.

## Qodobka 33

## Hirgalinta Heerka Qaran iyo Lasocoshada

1- Wadamada qaybta ka ah heshiiskan, ayagoo raacaya qaab-dhismeedkooda, waxay magacaabayaan qof ama labo ka tirsan dowladohooda kuwaas oo loo xilsaaraayo hirgalinta heshiiskan, waxaana tixgelin xoog leh la siinayaa sidi loo dhisi lahaa, ama loo diyaarin lahaa hab farsamo oo iskula shaqeeyaan dowladaha arrinati khusayso si loo fududeeyo go'aamada ay qaadanayaan ee waafaqsan arrintan, heerkooduna kala gedisanyahay.

2- Wadamada xubnaha ka ah heshiiskan, ayagoo raacaya habkooda sharci iyo maamul, ayaa xifdinaayo, xoojinaaya, ama qof u magacaabaayo, hab shaqo oo madaxbanaan, hadba sida ku haboon, si loo horumariyo, loona badbaadiyo, loolana socdo hirgalinta heshiiskan. Marka la samaynaayo habkaan, wadamada xubnaha ka ah heshiiskan waa inay tixgeliyaan mabaadi'da ku shaqada leh sida ay u shaqeeyaan hay'adohooda wadaniga ah si loo badbaadiyo loona horumariyo Xuquuqul Insaanka.

3- Bulshada Rayidka ah, gaar ahaan dadka naafada ah iyo ururada ka wakiilka ah waa inay si buuxda uga qayb qaataan habka lagu kormeeraayo Xuquuqul Insaanka.

## Qodobka 34

## Guddiga qaabilsan Xuquuqda dadka Naafada ah

1- Waa in la sameeyaa guddi qaabilsan xuquuqda dadka naafada ah (guddigaas oo hadda wixi ka dambeeya lagu magacaabi doono "Guddiga"), kaas oo fulin doona hawsha halkaan lagu sheegi doono.
2- Guddiga wuxuu ka koobnaanayaa, waa marka heshiiskani uu dhaqan-gelaayo, laba iyo toban (12) khabiir, kadib markii ay lixdan wadan ogolaadaan ama ansixiyaan heshiiskan, xubnaha Guddiga waxaa ku kordhaaya lix ruux, kuwaas oo tirada guud ka dhigaaya sided iyo toban (18).
3- Xubnaha Guddig ayaa sidooda u hawlgelaaya waana inay ahaadaan dad sumcaddooda iyo dareenkooda bani'aadanimo aad u sarreeyo, waana inay lahaadaan awood wax qabad iyo waaya aragnimo la aqoonsanyahay oo khuseeya dhamaan arrimaha uu xambaarsanyahay heshiiskan. Marka ay soo sharraxaan xubnohooda, wadamada qaybta ka ah Heshiiskan, waxaa laga rabaa inay tixgelin xoog leh siiyaan arrimaha ku qoran qodobka afaraad, faqradda sadexaad ee Heshiiskan.
4- Xubnaha Guddiga waxaa dooranaayo Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan, iyadoo la tixgelinaayo in xubnaha ay si isla eg uga yimaadaan Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan, taas oo loola jeedo in ilbaxnimada jirto oo dhan iyo dowladaha jira si isla eg, rag iyo haweenba, ay si siman uga muuqdan, waana inay kasoo qaybgalaan dadka khubarada ku ah arrimaha dadka naafada ah.
5- Xubnaha Guddiga waxaa lagu dooranayaa cod qarsoodi ah, waxaana laga dhex dooranayaa liiska ay soo gudbiyaan Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan, kuna soo gudbiyaan Shirka Guud ee Wadamadaas, shirarkaasi marka la fadhiyo, sadex meelood laba meel marka ay soo xaadiraan ayaa la helayaa kooram, sidaas darteed, shakhsiyaadka loo dooranaayo xubinimada

Guddiga waa inay ahaadaa kuwo helay codka ugu badan, waana inay helaan cod aad u badan, kana helaan Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan.

6- Wejiga hore ee doorashada waa in la qabtaa lix bilood gudohood kadib marka uu sharcigan hirgalo, ugu yaraan afar bilood kahor inta aan doorashada la gaarin, waa in Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa inuu waraaq u qoraa Wadamada Xubnaha ka ah Guddigaan asagoo ka dalbanaayo Wadamada inay soo gudbiyaan liiska musharraxiintooda muddo laba bilood gudohood ah. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa inuu diyaariyaa liiska isla markiiba, asagoo raacaayo sida ay alfabeetada ugusoo kala horreeyaan magacyada shakhsiyaadka iyo wadamada, wuxuuna usoo gudbinayaa Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan.

7- Xubnaha Guddigan waxay xilka haynayaan muddo afar sano ah, waxayna xaq u yeelan karaan in la doorto mar labaad, hase ahaatee lixdii xubnood ee lasoo doortay marki ugu horreysay wuxuu waqtogooda dhamaanayaa muddo laba sano gudohood ah. Doorashada koobaad kadib, magacyada lixda xubnood ee Guddigan ayaa lagusoo dooranayaa si qori-tuur ah (bakhti-nasiib ah) waxaana soo dooranaayo qofka guddoomiyaha ah, kaas oo ku xusan faqradda 5aad ee Qodobkan.

8- Doorashada lixda xubnood oo dheeraadka ah ee Guddiga waa inay si caadi ah u dhacdaa sida ay qabaan qodobbada ku habboon ee Heshiiskan.

9- Haddii uu dhinto qof kamid ah Guddiga, ama uu is casilo, ama uu caddeeyo/caddeyso inuusan / inaysan shaqadan wedi karin, wadamadii marki hore soo magacaabay qofkaas ayaa soo magacaabayo qof kale oo khabiir ah oo buuxinaya wixii shuruud ah eek u tilmaaman qodobkan, si uu markaasi hawsha usii wado inta ka hartay xilliga.

10- Guddigu waa inuu degsadaa xeer hoosaadkiisa shaqo ee gaarka ah.

11- Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa inuu bixiyaa shaqaale (ka shaqeeeya arrimahan) iyo wixii kale ee fududayn ah uuna siiyaa Guddiga si uu hawshiisa u gutto waa sida uu qabo Heshiiskaane, wana in Guddiigu qabsadaa shirkiisi ugu horreeyay.

12- Kadib marka la helo ogolaanshaha Golaha Guud ee Qaramada Midoobay, xubnaha Guddinag ee lagu dhisay Heshiiskan waa inay helaan gunno, kana helaan santuuqa Qaramada Midoobay muddada ay

shaqeeynayaan iyo xaaladda ay ku shaqaynayaan, taas oo Golaha Guud uu go’aamin doono, maadaama shaqada Guddigani ay muhiimad leedahay.

13- Xubnaha Guddigan waxay xaq u leeyihiin hawl fududayn, xafiisyo, xuquuq siyaasadeed, iyo xasaanadda ay leeyihiin diblomaasiyiinta ka shaqeeya hawlgallada Qaramada Midoobay, sida qaybo kamid ah Heshiiskan ay qabaan.

## Qodobka 35

## Warbixinta Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan

1- Wadan kasta oo xubin ka ah Guddiganwaa inuu usoo gudbiyaa Guddiga, asagoo usoo maraayo Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, warbixin dhamaystiran kuna aadan tallaabooyinka la qaaday ee lagu meel marinaayo waajibaadka uu saaaraayo Heshiiskan iyo wixii horumar ah ee laga sameeyay hirgalinta Heshiiskan (warbixintana waxaa lasoo gudbinayaa muddo laba sano gudohood ah kana billaabanaysa marka Heshiiskan uu dhaqan galo).

2- Markaas kadib, Wadamada Xubnaha ah waa inay soo gudbiyaan warbixinno is xigxiga ugu yaraan afarti sanaba mar, iyo in ka badanba, mar kasta oo Guddigu doono.

3- Guddigu waa inuu go’aamiyaa wixii tilmaamo ah ee ku habboon waxyaabaha ku qoran warbixinta.

4- Wadan xubin ka ah Heshiiskan haddii uu warbixin dhamaystiran soo gudbiyo marka hore, uma baahna inuu kusoo celiyo isla warbixintaas waqtiga kale ee warbixinnada la gudbinaayo. Marka Guddiga loo diyaarinaayo warbixin, Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waxaa loo sheegayaa inay warbixinnadooda usoo gudbiyan si furan oo isla-xisaabtan ku dhisan, sidoo kalena ay tixgeliyaan arrimaha ku qoran Qodobka 4, Faqraddiisa 3aad ee Heshiiskan.

5- Warbixinnadu waxay ku tusi karaan arrimaha iyo dhibaatooyinka jira, iyo heerka ay gaarsiisanyihiin dhibaatooyinka la xiriira meel marinta ku aaddan Heshiiskan.

## Qodobka 36

## Tixgelinta Warbixinnada

1- Guddigu waa inuu tixgeliyaa warbixin kasta, warbixintaas oo xambaarsan talo soo jeedin guud oo khusayso warbixinta (guud). Warbixinnada waxaa loo gudbinayaa dhamaan Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan. Haddii ay doonaan waxay Waddamadu jawaab ka bixin karaan warbixin kasta oo loo gudbiyo Guddiga. Guddigu wuxuu ka dalban karaa Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan xog hor leh oo ku aadan sidi lagu hirgelin lahaa Heshiiskan.
2- Haddii waddan xubin ka ah Heshiiskan uu si aad ah ulasoo daaho soo gudbinta warbixintiisa, Guddigu wuxuu u sheegi karaa waddankaas baahida loo qabo in la baaro heerka hirgelinta Heshiiskan iyo meesha uu marayo, iyadoo la raacaayo xog muhiim ah oo uu soo ururiyay Guddiga, waa marka warbixinta loo baahanyahay aan lagusoo gudbin muddo sadex bilood gudohood ah kadib marki ogaysiinta la siiyay waddanka arrintu khusayso. Guddigu wuxuu ku marti qaadi karaa waddanka arrintu khusayso inuu kasoo qeyb galo baaritaanka noocaas ah. Haddi waddanka arrintu khusayso uu soo jawabo oo uu soo gudbiyo xogtii loo baahnaa, waxaa qabanaayo waddankaasi faqradda 1aad ee Qdobkan oo kamid ah Heshiiskan.
3- Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ayaa usoo gudbinaayo warbixinta dhamaan Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan.
4- Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay warbixinnadooda si baahsan ugusoo gudbiyaan dadweynaha kunool wadamadooda waana inay u ogolaadaan dadweynaha inay kasoo talo dhiibtaan warbixinnada.
5- Guddigu waa inuu usoo gudbiyaa – hay’adaha ku shaqada leh hawshan, maaliyadda iyo qorshayaasha Qaramada Midoobay iyo hay’adaha kale ee awwdda wax qabad u leh warbixinta - warbixinnada ka timaado Wadadamada Xubnaha ka ah Guddigan si wax looga qabto codsiga ama baahida ku qoran warbixinta, sida haddi codsigaasi yahay mid farsamo, latalin iyo kaalmo kaleba, iyadoo la raacaayo aragtiyada iyo talo soo jeedinta Guddiga haddii ay wax jiraan.

## Article 37

## Iskaashiga u dhexeeya Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskan iyo Guddiga

1- Waddan kasta oo xubin ka ah Heshiiskan waa inuu iskaashi la sameeyaa Guddiga iyo xubnihiisaba sidii loo meelmarin lahaa waajibaadka Guddiga.
2- Marka laga hadlaayo xiriirka ka dhexeeya Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskan, Guddigu waa inuu siiyaa muhiimad weyn sida iyo habka kor loogu qaadaayo awoodaha heerka waddan ee waddamadaas, taas oo la xiririta hirgelinta Heshiiskan. Haddii loo baahdana waxaa loo mari karaa iskaashi caalami ah.

## Qodobka 38

## Xiriirka Guddiga iyo hay'adaha kale

Si qaab waxtar leh loogu hirgeliyo Heshiiskan, loona dhiirrigeliyo sidi lagu heli lahaa iskaashi caalami ah ee khuseeya arrimaha uu Heshiiskan ka hadlaayo:

a) Hay'adaha gaarka ah iyo kuwa kale ee Qaramada Midoobay waa inay awood u lahaadaan hirgelinta Sharcigaan maadaama arrimaha heshiisyadani ay kamid yihiin waajibaadka Qaramada Midoobay iyo hay'adaha kale. Guddigu wuxuu ku marti qaadi karaa hay'adaha gaarka ah iyo kuwa kale ee awoodda u leh arrimahaan inay talo ku dhisan khibrad ka bixiyaan sidi lagu hirgelin lahaa Heshiiskan, taladaas oo khusayso waajibaadkooda. Guddigu wuxuu ku marti qaadi karaa hay'adaha gaarka iyo kuwa Qaramada Midoobay inay warbixin ka keenaan hirgelinta Heshiiskan, gaar ahaan qeybaha hoos imaanaayo waajibaadka hay'adaha Qaramada Midoobay iyo kuwa kale.
b) Guddigu waa inuu la tashtaa hadba intii ay la egtahay taladu uuna la tashanaayo hay'adaha arrintani khusayso, kuwaas oo ku qeexan heshiisyada khuseeyo arrimaha bani'aadanimada, si loo xaqiijiyo inay soo saaraan warbixin midaysan iyo talo soo jeedinta Guddiga, sidoo kalena laga hortago warbixinnada is soo nqonoqda.

## Qodobka 39

## Warbixinta Guddiga

Guddigu waa in labadii sanaba uu warbixin soo siiyaa Golaha Guud iyo Guddiga Dhaqaalha iyo Arrimaha Bulshada, kanasoo warbixiyaa waxqabadkiisa. Wuxuuna la imaan karaa talo soo jeedin guud taas oo ku qotonta arrimaha ay xambaarsantahay Warbixintu, iyo xogta lahga helay Wadamada Xubnaha ka ah Heshhiskan. Talo soo jeedinta guud ee Guddiga waa inay ahaataa qayb kamid ah warbixinta Guddiga, taas oo xambaarsan wixii faallo ah, haddiiba ay jiraa, kana imaanaya Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan.

## Qodobka 40

## Shirwaynaha Wadamada Xubnaha ka ah Guddigan

1- Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inay si joogta ah iskugu yimaadaan kulan, si ay uga wada hadlaan wixii arrimo ah ee khuseeyo hirgelinta Heshiiskan.
2- Ugu badnaan lix bilood kadib markuu Heshiiskan dhaqan galo, Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan waa inuu Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qabtaa shir, shirarka kale ee ka dambeeyana waa inuu Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay uu qabtaa labadii sanaba mar, ama wixii go'aan ah ee ay gaaraan Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan.

## Qodobka 41

## Kaydinta

Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ayaa kaydinaya Heshiiskan.

## Qodobka 42

## Saxiixa

Laga billaabo 30ka Maarso 2007, Heshiiskani wuxuu diyaar ku ahaanayaa xarunta Qaramada Midoobay ee New York si ay u saxiixan Wadamada iyo urur goboleedyada isku dhafka ah.

## Qodobka 43

## Ogolaanshaho iyo Waajib yeelid

Heshiiskani wuxuu ahaanayaa mid ay saxiixaan Wadamada, sidoo kalena waxaa xaqiijinaayo urur goboleedyada isku dhafka ah. Markaas kadibna, Heshiisku wuxuu u furanyahay in wadankii raba iyo ururkii raba inuu ogolaado, hadii uusan horay u saxiixay.

## Qodobka 44

## Urur goboleedyada isku dhafka ah

1- "Urur goboleedyada isku dhafka ah" waxaa loola jeedaa urur ay sameeyeen wadamo madaxbanaan kuna yaalla gobol la yaqaano, ururkaas oo wadamada samaystay ay soo siiyeen awood waxqabad oo la xiriirta Heshiiskan. Ururada sidaan oo kale ah waa inay cadeeyaan awoodda ay leeyihiin ee la xiriirta Heshiiskan, awoodaas oo ku saabsan heshiiska ay caadi ahaan ogolaanayaan. Markaas kadib, waa inay ku wargeliyaan xafiiska kaydiya Heshiiskan wixii isbedello ah ee ku yimaada awooddooda.
2- Wixii wargelin ah ee la siinaayo Wadamada Xubnaha ka ah heshiiskan ayaa sidoo kale loo siinaayaa urur goboleedyada taas oo waafaqsan waajibaadka loo xilsaaray.
3- Lama tirsanaayo wixii heshiis ah ee ay kaydiyaan uru goboledyada isku dhafka ah, iyadoo la dhowraayo qodobka 45, faqraddiisa 1, iyo qodobka 47, faqraddiisa 2 iyo 3 ee Heshiiskan.
4- Urur goboleedyada isku dhafka ah, marka ay jiraan arrimo awooddooda khuseeyo, waxay cod ka dhex dhiiban karaan shirarka ay iskugu yimaadaan Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan. Codkooduna waa inuu la ekaadaa

codka Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan. Isla urur goboleedyadan ma codayn karaan haddii waddan kamid ah wadamada ay matalaan uu codeeyo. Sidoo kalena way codayn karaan haddii uusan codaynin waddanka kamidka ah wadamada ay matalaan urur goboleedyadu.

## Qodobka 45

## Dhaqan-gal

1- Heshiiskani wuxuu dhaqan gelayaa 30 maalmood kadib marka tiro heshiisyo ah oo gaaraaya 20 ay saxiixaan ama ansixiyaan Waddamada ama Ururada.
2- Heshiiskani wuxuu dhaqangelayaa 30 maalmood kadib marka heshiisyo gaaraya labaan ay ansixiyaan ama saxiixaan Waddamada ama Ururada.

## Qodobka 46

## Ka gaabsasho

1- Waa inaan la ogolaanin wixii ka gaabsasho ah ee aan waafaqsanayn hadal qoraalkan iyo ujeedada laga leeyahay Heshiiskan.
2- Waqtigi la doono ayaa laga noqon karaa ka gaabsashada.

## Qodobka 47

## Wax ka badal

1- Waddan kasta oo Xubin ka ah Heshiiskan ayaa soo jeedin kara wax kabadalid asagoo soo marinaayo tala soo jeedintiisa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobayna wuxuu u gudbinayaa Wadamada Xubnaha ka ah Heshiiskan wixii wax ka badal ah ee lasoo jeediyay, asaga oo soo raacinaayo codsi ah in wadamada ay rabaan in loo qabto shirweyne si ay go’aan uga gaaraan wax ka badalka lasoo jeediyay, hadii muddo 4 bilood gudohood ah, kana billaabanayso muddada Xoghayaha Guud uu shaaciyay arrinta, ay saddex meelood labo meel oo kamid ah Waddamadu ay ogolaadaan in loo qabto shir, Xoghayaha Guud wuxuu qabanayaa shir, kaas oo aymarti galinayso Qaramada Midoobay. Wixii wax

kabadal ah oo ay u codeeyaan sadex meelood laba meel oo kamid ah Waddamada, waa in Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay uu codeyntaasi u gudbiyo Golaha Guud ee Qaramada Midoobay si loo ogolaado kadibna wax kabadalka waxaa loo gudbinayaa Waddamada Xubnaha ka ah Heshiiskan si ay u ogolaadaan.

2- Wixii wax kabadal ah ee la go'aansado waafaqsanna faqradda 1aad ee qodobkan, waxay dhaqan gelayaan 30 maalmood kadib marka tirada heshiisyada la ogolaaday ee la kaydiyay ay gaaraan 3 meelood laba meel, taas oo kasoo billaabanaysa maalinta la saxiixay wax ka badalka. Markaas kadib, wixii wax laga badalay waxay dhaqan gal u noqonayaa waddan kasta maalinta uu saxiixay. Wixii qodob ah ee wax laga badalay waxay waajib ku noqonayaa Waddamada xubnaha ka ah Heshiiskan ee saxiixay.
3- Haddii Waddamada xubnaha ka ah Heshiiskan ay shirka ku jiraan isku afgartaan wixii qodob ah ee la badalay ee lagu ogolaaday sida uu qabo faqradda 1aad ee Heshiiskan, taas oo khusayso qodobka 34, 38, 39 iyo 40 wuxuu dhaqan gal u noqonayaa dhamaan waddamada oo dhan 30 maalmood kadib marka heshiisyada la saxiixay ee la kaydiyay ay gaaraan laba meelood meel, taariikhdaas oo ka bilaabanaysa maalinta la ansixiyay isbadalka.

## Qodobka 48

## Ka bixid/Tanaasulid

Waddamada xubnaha ka ah Heshiiskan ayaa ka bixi kara Heshiiskan iyagoo qoraal u qoraayo Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Ka bixiddan waxay dhaqangelaysaa hal sano kadib marka Xoghayaha Guud uu helo qoraalka ka bixidda.

## Qodobka 49

## Helitaanka hadal-qoraalka

Hadal-qoraalka Heshiiskan waa inuu ahaadaa mid la heli karo.

## Qodobka 50

## Afka rasmiga ah ah ee qoraalka

Nuqullada sida siman rasmiga u ah waa kuwa ku qoran Afafka Carabiga, Shiinayska, Ingiriiska, Faransiiska, Ruushka iyo Isbaanishka.

WAXAY KA MARKHAATI FURAYAAN saraakiishan idman in ayagoo wakiil ka ah wadamadooda ay saxiixeen Heshiiskan.